

## Jamahuuriyadda Somaliland

### Miisaaniyadda 2021

#### Khudbadda wasiirka Maaliyadda

##### 1. Hordhac

Mudane Gudoomiye, iyo Mudanayaal aniga oo ku hadlaaya magaca Wasaaradda maaliyadda oo gudanaaya waajibka Dastuurka qaranka qodobkiisa 55<sup>th</sup> farqadiisa 1aad iyo xeerka maamulka maaliyadda xeer No. 75/2016 qodobkiis 5aad, waxaa farxad ii ah in aan maanta oo taarikhdu tahay 8-da bisha Diisambar 2020 idin horkeeno miisaaniyaddii 30aad ee dawladda ee sannadka 2021-ka.

##### 2. Diyaarinta Miisaaniyadda

Mudane gudoomiye, iyo mudanayaal, hawlaha culus ee wasaaraada maaliyaddu u xilsaarantahay waxaa ka mid ah diyaarinta miisaaniyadda. Oo leh habraac qaata illaa lix bilood. Sannadkan waxaanu talaabo talaabo u raacnay habraaca Xeerka PFM-ka ama nidaamka dib u habaynta maaliyadda, kaasoo na faraaya:

1	In la diyaariyo qoraal ku saabsan xaaladda dhaqaale 'Budget Outlook paper'(May)
2	In guddida Siyaasadda miisaaniyadu qeexo waxyaabaha mudan iyada oo ka duulaysa Qorshaha Horumarinta qaranka NDPII(May)
3	In la dhiyaariyo, qoraal ku saabsan xaaladda dhaqaale 'Macro economic and Fiscal Framework) sidday u ekaan doonto (waxsoo saarka, ganacsiga dibedda, ascaarta iwm) mudada dhow iyo ta dhexe (June)
4	In la sameeyo qaab dhismeedka miisaaniyadda (Budget framework) (June)
5	In la wargeliyo wasaaradaha iyo hay'adaha Diyaarinta iyo soo gudbinta Miisaaniyadda (July)
6	In talo wadaag lala yeesho Guddida dhaqaalaha ee golaha wakiilada( July)
7	In dood furan iyo wada tashi lala yeesho dadweynaha (July)
8	In hay'adaha iyo wasaaradaha mid mid looga wada hadlo Miisaaniyadda ay soo gdbisteen (September)
9	In miisaaniyadda lagu diyaariyo habka iswada SLMIS
10	In Golaha wasiirada la hor keeno si ay u ansixiyaan (Sep)
11	In golaha wakiilada la hor keeno si looga doodo loona ansixiyaan (October)

### 3. Hantaaqooyinka iyo Saamaynta Dhaqaalaha (pp1)

Mudane guddoomiye iyo Mudanayaal, miisaaniyadda sannadka 2021 ee aanu halkan idiinku soo gudbinaynaa waxay ka turjamaysaa xaaladda dhaqaale ee sannaadkan 2020 iyo odoroska xaaladda dhaqaale ee 2021.

Sannadkani wuxuu ahaa sannad adag, Waxaa dhaqaalaha so gaadhay hantaaqooyin badan oo saameeyey miisaaniyadda sannadkan iyo ta soo socotaba: hantaaqooyinka waxaa ka mid ahaa

1	Covid19
2	Ayax
3	Xayiraada xajka
4	Xayiraada isu socodka
5	Iyo Xaaladda Ethiopia oo dhaqaale ahaan aad isugu xidhanahay

Hantaaqooyinkaas waxaa ka dhashay in:

		Isbarbardhiga J-S 2019 iyo 2020
1	Xoolaha dhoofa	-39% hoos u dhaceen J-S 2020
2	Qiimaha alaabta dekedehheena kasoo degta	-3.8 % hoos u dhacay
3	Tirada Containerada	-11.8 % hoos u dhacay
4	Dadka madaarka Hargeisa ka soo degaayey	-60% hoos u dhacay
5	Sibidhka aynu soo dhoofsano	-18% hoos u dhacay
6	Qaadashada Liisamada ganacsi	-25% hoos u dhacay
7	Dakhlighii la filaayey in mudadaa uu inna soo galo	-7 % hoos u dhacay

Dhinaca kale waxaynu ku guulaysanay in aynu xakamayno sicirbararka iyo qiima dhaca shillinka J-S, xawaaladduna nasiib wanaag isma dhimin.

		2019	2020
1	Sicir bararka	5.6 (December)	6.2 (sept)
2	Sarifka	8,670 Jan 2020	8,650 (sept)

3	Xawaaladda	Korodh	3.9% up
---	------------	--------	---------

Waxa kale oo aynu guulaysannay in bil walba mushaharka la bixiyo bisha oo aan dhamaan

Waxaynu filaynaa in sannadkan uu yimaado hoos u dhac dhaqaale - **2-3%**.  
Sannadka soo socdana dhaqaaluhu koro **1-2%**.

Hoos u dhaca dhaqaale ee sannadkan 2020 mid innaka innoo gaara maaha ee waa mid caam ah. Hay'adda Lacagta ee aduunka ah ee loo yaqaano **IMF** waxay sadaalisay in dhaqaalaha dunidu hoos u dhacdoon sida ku cad shaxdan:

		% isbedel
1	Wadamada soo koraaya	-3.3 %
2	Wadamada horumary	-5.8 %
3	Caalamka isku celcelin	-4.4 %

#### 4. Miisaaniyadda (pp 1)

Gudoomiye iyo mudanayaal:

Annaka oo xaaladda dhaqaale ee sannadkan iyo ka soo socda ka doolayna waxaanu miisaaniyadda sannadka 2021 ku soo ururinay sida ka muuqata shaxdan:

		2020	2021	% increase
1	<b>Dawladda dhexe</b>	<b>2,046 billions</b>	<b>2,102 billion</b>	<b>2.7</b>
2	Dawladda hoose	316	368	16.5
3	Hay'adaha madaxa banana	242	248	2.5
4	SDF	75	88	17.3
5	World Bank	56	64	14.3
6	JPLG	16	13	-18.8
	<b>Total</b>	<b>2,750</b>	<b>2,882</b>	<b>4.8</b>

Miisaaniyadda dawladda dhexe waxay ka badantahay tii 2020 **2.7%**.

Miisaaniyadda wadarta guudna waxay tii 2020 ka badantahay **4.8%**

## 5. Dakhliga (PP 19)

Miisaaniyaddu waxay ka imanaysaa:

		billions	%
1	Cashuurta Kastamyada	1,060	50.4
2	Cashuurta iibka	694	33
3	Cashuurta mushaharka	105	5
4	Cashuurta macaashal macaashka	39	2
	Cashuuraha kale	92	4.4
5	Dakhliga kale	112	5.3
	Wadar	2,102	

## Cashuuraha Kastamka (PP 20)

	Kastamyada	2021	%
1	berbera	1091 billions	66.4
2	Kala Baydh	349	21.2
3	Zayla	95	5.8
4	Hargeisa Airport	40	2.4
5	Borama	20	1.2
6	Wajaale	19	1.2
7	Inta kale (14)	27	1.6
	Wadar	1642	

## Cashuura Beriga (PP 20)

		2021	
	Hargeisa	252.2 billion	66.6
	Berbera	71.8	19
	Burao	17.9	4.7
	Borama	17.4	4.6
	Gebiley	8.9	2.4
	Erigavo	4.6	1.2
	Laas Aanood	3.6	1
	Zeila	1.4	0.4
	Caynabo	0.9	.2
		378.6	

## 6. Siyaasadda (pp 21)

Miisaaniyadda 2021 waxay ku salaysantahay siyaasadahan:

1	Isu dheeli tirka dakhliga iyo kharashka
2	Xakamaynta sicir bararka (6%)
3	Ilaalinta qiimaha shillinka (8,500)
4	kor u qaadista saamiga cashuuraha beriga
5	Adkeynta amniga
6	Illaalinta cadaaladda
6	Dhiirigelinta wax soo saarka
7	Ilaalinta deegaanka
8	Shaqo abuurka – Shaqaalaha cusub ee dawladdu wuxuu ku dhowyahay (4,800)
9	Joogteynta mashruuca shaqo qaran
10	Maamul daadejinta iyo u dhamaystirka kabka (12.5%) dawladdaha hoose
11	Joojinta cashuurta macaashal macaashka ee dekedda lagu qaado(0.5%)
12	Joogtaynta tacriifadda cashuuraha macaashal macaashka (10%), iisiga (5%), mushaharka (6%), iyo kirooyinka (10%)
14	Samaynta sanduuq dadka dhimirka qaba u gaar ah oo laga maal gelinaayo 200 sh. Oo loo saaro Kg. qaadka ah.
15	Fududaynta cashuur bixinta si loogu bixin karo Zaad iyo E-dahab
13	Joojinta lacagaha aan sharciga ahayn ee laga qaado cashuur bixiyaha
14	Midaynta hab xisaabeedka (Standard chart of accounts) dawladda dhexe, dawladdaha hoose, iyo hay'adaha madaxa banaan
15	Daahfuraanta iyo isla xisaabtanka

## 7. Mudnaanta Miisaaniyadda

Waxaa miisaaniyadda mudnaanta la siiyey

1	Amniga
2	Cadaaladda
3	Caafimaadka
4	Wax soo saarka
5	Deegaanka
6	Tamarta
7	Maamul wanaaga
8	Doorashooyinka

9	Wax barashada
10	Ictiraafka
11	Shaqo abuurka

### 8. Wadaagayaasha kharash (pp 24)

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal: Miisaaniyadda dawladda dhexe waxaa loo qaybiyaa 59 hay'adood iyo wasaaradood oo 10 wadaage loo qaybiyo . Sida ay miisaaniyadu u qaybsantahayna waa sidan.

### Kharashka miisaaniyaddu wuxuu ku baxayaa 2021 (PP 25-29)

1	Difaaca iyo amniga (10)	744 billion	35.4%
2	Maamulka (20)	423	20%
3	Dhaqaalaha (5)	311	14.8%
4	Wax barashada(3)	194	9.2%
5	Caafimaadka (4)	110	5.2%
6	Kaabayaasha (4)	99	4.7%
7	Waxsoo saarka (2)	54	2.5%
8	Deegaanka (2)	29	1.4%
9	Biyaha (1)	24	1.14%
10	Tamarta (2)	14	0.65%
	Qaybaha kale	100	4.8

### 9. Qaybaha kharashka 2021 (PP 30)

Dhinac kale madaxyada ay miisaaniyaddo ka baxaysaa waa 8 madax oo kala ah:

1	Mushahar iyo gunooyin	1,085 billion	51.6%
2	Hawla socodsiin	567	27%
3	Mashaariic	150	7.1%
4	Dhismayaal iyo hanti maguurto ah	108	5.2%
5	Deyn	75	3.6%
6	Lama filaan	62	3%
7	Kaalmooyin	49	2.4%
8	Kayd	5	0.2%

## 10. Hantida raagta ee Dawladdu maal gelinayso 2021 (PP 31-32)

Waxaa ka mid ah:

	dhismayaal	Jaamacado
		Iskuulo
		Xanaanooyin
		Buundooyin
		Ceelal
		Dekeda Maydh
		Bakhaaro keyd
	Gaadiid	
	Qalab	xafiis
		Caafimaad
		Wax barasho
		Ciidan

## 11. Mashaariicda dawladu maal gelinayso 2021 Waxaa ka mid ah

	Mashaariic	Waxbarasho
		Caafimaad
		Shaqo qaran
		Beero
		Xoolo
		Deegaan
		Sahamin macdan
		Technolojiyad iyo booso
		Ciyaaraha dhalinyaradda
		Wadooyin
		Doorashooyin
		Goobo wershadeed (industrial zones)

## 12. Mashaariicda Bangiga dunida 2021 (PP 33)

1	Dib u habaynta shaqaalaha dawladda
2	Horumarinta korontada
3	Dib u habaynta maamulka maaliyadda

### 13. Mashruuca Horumarinta SDF 2021(PP 34)

1	Dekeda Maydh
2	Wadada Berbera – Burao
3	Biyo ballaadhinta Caasimadda Hargeisa
4	Ka hortaga nabaadguurka MJ
5	Biyo balaadhinta Borama
6	Caafimaadka iyo tayenta xoolaha

### 14. Mashaariicda JPLG 2021(PP34)

Mashruucan waxaa maal geliya dawladda dhexe (15%), Dawladaha Hoose (6%), iyo hay'adaha UNta (79%). Waxaa sannadka 2021 laga hirgelinayaa mashaariic 8da degmo ee:

1	Berbera
2	Borama
3	Burao
4	Gabeley
5	Hargeisa
6	Oodweyne
7	Sheikh
8	Saylac

### 15. Mashaariicda laga maalgeliyey Sanduuqa horumarinta Gobolad Bariga (2%) sannadka 2020

1	MCH	Kaladhac	Dhahar
2	MCH	Booda Cadde	Dhahar
3	Garadag university	Garadag	Sanaag
4	Tabca road	Erigavo	Sanaag
5	MCH	Laas Qoray	Sanaag
6	District commissioner office	Laas qoray	Sanaag
7	Primary/secondary school	Laas Anood	Sool
8	Waste dumping pit	Laas Aanood	Sool



9	Nugal University	Laas Aanood	Sool
10	Football field	Caynaba	Sool
11	Police station	Fiqifuliye	Sool
12	District commissioner's office	Fiqi fuliye	Sool
13	District commissioner building	Awr boogays	Sool
14	District commissioner's office	Yagoori	Sool
15	Police station	Yagoori	Sool

## 16. Dawladaha hoose iyo Hay'adaha Madaxa banana 2021 (Volume II)

Mudane Guudoomiye iyo Mudanayaal waxaan markale halkan idiinku soo gudbinayaa miisaaniyadda Dawladaha hoose iyo hay'adaha madaxa banana oo faahfaahsan annaka oo ka duulayna qodobka 5aad farqadiisa 1aad ee Xeerka, maamulka maaliyadda Qaranka Lr.75/2016.

## 17. Dawladaha Hoose 2021

Kharashka miisaaniyadda 2021 ee dawladaha hoose oo dhan **368 Billion** Sl.Sh. wxuu ku bixidoonaa sidan

1	libsiga adeega iyo alaabta	151 billion	41%
2	Mushaharka shaqaalaha	85	23.1
3	Dhismeyaasha	43	11.7
4	libsiga hantida ma guurtada ah (ex. Buildings)	38	10.3
5	Kaabis	37	10.1
6	Mashaariic	9	2.4
7	Deyn bixin	4	1.1
8	Kayd	1	0.3
	Wadar	368	

## 18. Hay'adaha Madaxa Banaan 2021

Miisaaniyadda hay'adaha madaxa banana oo ka kooban 10 hay'adood waxay dhantahay **248 billion** Sl.sh. waxanay u qaybsantahay sidan:

	Baanka dhexe	53 billion	21.4
	Haamaha shidaalka	35	14.1
	Madbacadda qaranka	40	16.1

	Dekedda Berbera	33	13.3
	Wakaaladda Biyaha Hargeysa	41	16.5
	Wakaalada biyaha Burao	19	7.7
	Wakaalada biyaha ee Borama	14	5.6
	Wakaalada biyaha ee Berbera	8	3.2
	Wakaalada biyaha ee Gebiley	4	1.6
	Wakaalada biyaha ee Arabsiyo	1	0.4
		248	

## 19. Codsii ansixin

Mudane Gudoomiye, iyo mudanayaal, waxaanu idin soo hordhignay miisaaniyad Faahfaahsan, oo lagu dhisay nidaamka maamul wanaaga maaliyadda, xambarsanna xog iyo siyaasad cad oo tafatiran, ka turjumaysa awoodeena, waafaqsanna himilooyinkeena iyo qorsheena qaran.

Waxay miisaaniyadani xoojinaysaa amniga, **ilaalinaysaa cadaalada, daadejinaysaa maamulka, dhiiri gelinaysaa wax soo saarka.** Waxaanu markaa idinka codsanaynaa, idinka oo ka gudanaya waajibaadkiina dastuuriga ah, in aad ansixisaan miisaaniyadda sannadka 2021.

Wa bilaahay towfiiq

Waa mahadsantihin